Portland Public Schools 2020 FALL Relmagining Education During the Pandemic

# Dayrta 2020: Wararkii Ugu Dambeeyey ee Xannaanada Daryeelka Caruurta

**Sebtamber 9, 2020**

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Waxa aan idiin rajeyneynaa idinka iyo ardaydiinu inaad bilowdeen sanad-dugsiyeedka 2020-21. Marna sanad-dusgiyeed sidani oo kale umeynaan bilaabin, marka aad eegto xaaladahani,haddana waxaan idiinka mahadcelineynaa fahamkiina aad nagula shaqeyneysaan in aan furdaamino caqabadaha doorka ah ee uu keenay xanuunkani.

Caqabadaha gaarka ah ee ay wajahayaan qoysaska shaqeeyaan waa sidii ay u heli lahaayeen xannaanada daryeelka caruurta. Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay wada hadal la yeesheen daryeel bixiyaasha xannaanada daryeelka caruurta oo wata shatiyo sharci ah sidii aan go'aan uga qaadan lahayn haddii iyo waliba sidii aan door muhiim ah uga qaadan lahayn xitaa kaalin gaaban kordhinta tirada daryeelka caruurta loo helayo qoysaskeena. Maadaama ay dhismayaashii iskuuladeenu ay xiran yihiin taasina ay sababtay xiyiraada Gobolka Oregon ee COVID-19, waxa aan u heli karnaa tiro yar oo kooban oo ay ku jiraan daryeel-bixiyaasha daryeelka caruurta.

Dhammaadka bishan Sebtamber, waxa aynu si tartiib ah u bilaabi doonaa daryeelka caruurta goobaha dugsiyada degmada oo dhan. Wajigayaga hore hawshani waxaa **lagu bilaabi doonaa sagaal goobood**,**kuna kooban 30-40 oo ah da'da ardayda goob kasta,** taasi oo buuxisay shuruuda ah inay leedahay shatiga sharciga nabadgelyada makhaayada iyo inay u addeegto ardayda bulshooyinka kala dadweynaheena. Barnaamijyada daryeelka caruurta oo ku shaqeynaya qandaraaska ay siiyeen hay'adaha daryeelka caruurta oo leh Xeerasha Shatiyada Daryeelka Caruurta iyada oo kayd ahaan 50% kuraaska xannaanadaas laga siinayo qoysaska u qalma gargaarka gobolku siiyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo. Barnaamijyada daryeelka caruurta waxaa loo aasaasay goob gaar oo ka baxsan goobihii ay isticmacalayaan shaqaalaha iskuulka oo dhici karto inay casharada ka bixinayaan fasaladoodii.

Kani waa hab taxadirkiisa leh oo u oggolaanaya daryeel-bixiyaha waqti ay ku tababaraan shaqaalaha, habeeyaan goobta iyaga oo xaqiijinaya shuruudaha adag ee loo dhigay shatiga si guul leh loo hirgaliyo.

**Wax badan waxaad ka ogaan kartaa oo ku saabsan goobaha iyo daryeel-bixiyaasha iyada oo aad ka diiwaangali karto barnaamijka daryeelka caruurta ee Qandaarlaha Daryeelka Caruurta Shatiga Sharciga Leh Waqtiga Lagu Gudo Jiro Waxbarashada Guryaha Lagu Qaadanayo oo Dhammeystiran Xaashida Xayeysiiska.**

Tiradani waxaa suurtagal ah in si degdeg ah loo buuxiyo. Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay sii wadi doonaan inay diirada saaraan inay ku xiraan qoysaska daryeelka caruurta sidii kor loogu qaadi

lahaa inay helaan addeegaasi. Sababtaasi ayaa Dugsiyada Dadweynaha Portland oo kaashanayaa Agabyada Daryeelka Caruurta iyo Loona Gudbinayo lagu ogeysiinayo Maamulayaasha Goobaha SUN, Xiriiriyaal Dhaqan ahaan iyo Wakiilada Bulshadu sidii ay u gargaari lahaayeen inay helaan daryeelka caruurta iyo kabka gobolku siiyo qoysaska.

**Fadlan waxaad fiirisaa hoos macluumaad dheeraad oo ku saabsan sida loo helayo daryeelka xannaanada caruurta iyo gargaarka dhaqaale.** Haddii qoysasku ay u qalmaan, kabka wuxuu bixinayaan inta ama dhammaan kharashka daryeelka xannaanada caruurta. **Waqtiga kama dambeysta ahi inaad codsato qiimo hoos loo dhigay/lacag la'aan waa bisha Oktoobar 31.**

Waxa aan sii wadi doonaan inaan qoysaska la shaqeyno sidii aan u taageeri lahayd maadaama aynu ku jirno waqtiyo adag. Waxa aan u mahadcelineynaa daryeelayaasha xannaanada caruurta ee aan saaxiibka nahay kuwaasi oo rabo inay dhismayaashayada ugu fidiyaan daryeel xannaanada iyaga oo ku kalsoon inay addeegaasi u bixin karaan si nabadgelyo ah. Haddii aad heyso wax su'aalo, fadlan waxaad nagala soo xiriir kartaa childcareservices@pps.net.

Waad mahadsan tihiin.

**Sida Loo Helo Daryeelka Xannaanada Caruurta iyo Gargaarka Dhaqaalaha**

**211info**

Si aad u hesho gudbiye gaar kuu ah barnaamijyada daryeelka caruurta ee degdega ah, waxaad la xiriirtaa 211infor adiga oo:

**Doorashada 1:** Waxaad wacdaa 211

- Waxaad gujisaa 1 Luqada Ingiriiska, 2 Luqada Isbaanishka, # dhammaan luqadaha kale oo dhan
- Waxaad galisaa 5 lambar ee zip code-ka
- Waxaad gujisaa 3 daryeelka caruurta
- Waxaad gujisaa 2 si aad u gaarto daryeel-bixiyaha daryeelka caruurta ee qoyskaaga.

**Doorashada 2:** Fariinta degdega ah ku soo diraya ereyga caruurt("children") ka dibna lambarka 898211 (TXT211).

**211 SAACADOOD:** Isniin-Jimco: 7 subaxnimo ilaa 11 Subaxnimo.; Sabti ilaa Axad: 8 subaxnimo ilaa 8 Habeenio

**Helitaanka Gargaarka Dhaqaalaha** qy, ama waxaad si toos ah u wacdo qeybta bixisa ee 1-800-699-9074.

- Foomamka biilasha iyo foomamka liistooyinka: dpu.billing@dhsoha.state.or.us
- Su'aalaha guud: customerservice.dpu@dhsoha.state.or.us
- Haddii rabto in lagaa caawiyo foomamka? Haddii ilmahaagu wax ka barto iskuulka addeegyada SUN, waxaad la xiriirtaa maamulaha SUN ee goobta iskuulka ku yaalo. Wakiilada bulshada iyo Xiriiriyaasha P-3 oo sidoo kale la tababaray.

Xanuunka COVID dartiis, xadka dhakhliga kor ayaa loo qaaday bilowga inaad u qalanto, iyada oo kabka kharashka si weyn loo siyaadiyey. Si aad u hesho kabka la kordhiyey 12 ka bilood, qoysasku waa in ay si dhammeystiran u soo buuxiyaan foomka **bisha Oktoobar 31.**